

SIDEE BAY DOCS KU CAAWIYAAAN QOYSASKA?



WADA ILAALINTA AMMAANKA CARRUURTA IYO QOYSASKA

DoCS micnaheedu waxaa weeye Adeegyada Wasaaradda Bulshada ee NSW (NSW Department of Community Services).

Shaqadeena ugu badani waxaa weeye in carruurta ammaankooda la ilaaliyo. DoCS waxay ka caawisaa qoysaska sidii ay carruurta u korin lahaayeen iyo dhalinyarada faraxsan, xooggan oo caafimaadka leh.

Carruurta waa qaali dhammaanteena waxaan u rabnaa carruurteena nolosha ugu fiican. Laakiinse qoysas badani waxay u baahan yihiin taageero si carruurtooda u xannaaneeyaan.

Qoysaska qaarkood waxa ka jira dhibaatooyin dheeraad ah oo nolosha ku sii adkeeya, tusaale:

- Ma laha wax qaraabo ama saaxiibo oo u dhow oo taageera
- Shaqo la'aan, jirro, takoorid ama cidlanimo
- Khibrad xadidan oo ay u leeyihiin waalidnimada
- Dhibaadada alkolada ama daroogada
- Shaqaaqada guriga

DoCS waxay caawin kartaa qoysaska u baahan taageerada.

SIDEE BAY DOCS KU CAAWISAA QOYSASKA?

Noqoshada waalidku waxay noqon kartaa mid adag. Caawimaad iyo taageero waxay noqon kartaa wax sameeya kala duwanaan ballaaran.

DoCS waxay maalgelisaa adeegyada bixiya caawimaada qoysaska si dhammaan carruurta ay u helaan bilow fiican oo nololeed.

Barnaamijyada sida *Mustaqbalada Cusub* iyo *Qoysaska NSW* waxay siiyaan caawimaad qoysaska iyagoo u sameynaya adeegyada ah guri ku booqasho, barnaamijyada waalidnimada iyo playgroups.

Barnaamijyadaan waxay dhisaan qoysas xoog badan iyo bulshooyin si ay kor ugu qaadaan wanaaga carruurta iyo dhalinyarada.

Shaqadeena ugu muhiimsan waxaa weeye in laga ilaaliyo carruurta iyo dadka dhalinyarada ah ee NSW waxyeelada iyo dayacaada – tan waxaa loogu yeeraa ilaalinta carruurta.

DoCS waxay la shaqeysaa wakaaladaha kale ee dawlada iyo ururada bulshada si ay carruurta ammaankooda u ilaaliyaan.

SHARCIGU MUXUU SHAQO AH OO UU KU LEEYAHAY QOYSASKA?

Waalid ahaan waxaan masuul ka nahay ilaalinta carruurteena laakiinse marmarka qaarkood qoysaska ma awoodaan inay ilaaliyaan ama xannaaneeyaan carruurtooda.

Sharciyada ilaalinta carruurta waxay u jiraan si ay carruurta u ilaaliyaan iyo dhalinyarada ka yar 18.

Sharciga ayey ka soo horjeedaa inaad dhaawacdo, wax u geysato, waxyeelayso ama dayacdo carruurta.

Dayac waa marka waalidku ayna fulin baahida aasaasiga ah ee ilmaha sida hoy, cunto, dhar iyo daryeelka caafimaad.

Waxyeelo jireed waa marka waalidku dhaawaco ilmaha isagoo wax ku dhufanaya, garaacaya, ruxaya, gubaya ama siyaalo kale.

Waxyeelo maskaxeed waxay noqon kartaa siin la'aanta jaceyl, hanjabaad, xoog u sheegasho ama u bandhigida carruurta shaqaaqada guriga.

Waxyeelo galmo waa nooc kasta oo ka mid ah fal galmo oo carruurta lala sameeyo.

WAA MAXAY SABABTA AY DOCS UGU LUG YEELANAYSO QOYSASKA?

DoCS waxay la shaqeysaa qoysaska si ay uga caawiso inay wada joogaan oo ay carruurtooda wada ilaaliyaan.

DoCS waxay masuul ka tahay xannaanada iyo ilaalada carruurta iyo dadka dhalinayarada ah ee NSW.

Khadka taleefanka ee DoCS wuxuu helaa warbixino badan oo ku saabsan carruur ku jirta khatar ama dayacaad. DoCS ka dib waxay la shaqeynaysaa waalidiinta si ay u hubiso inay carruurta ammaan yihiin.

Markuusan ilmuhu ammaan ku ahayn qoyskooda, DoCS waxaa laga yaabaa inay u baahato inay hesho guri haboon oo qof qaraabo ahi leeyahay ama xannaaneeye kale. Tan waxaa laga yaabaa inay noqoto wakhti gaaban ama wakhti dheer.

DoCS ma bedeli karto waxa qoyska ama bulshadu ay u qaban karaan carruurta.

YAA CAAWIN KARA?

Khadka Taleefanka Waalidka (24 saac)	132 055
Adeega Macluumaadka Qoyska	1800 049 956
Khadka Taleefanka Waalidka ee Tresillian	1800 637 357 (02) 9787 0855 (Sydney)
Khadka Taleefanka Carruurta	1800 551 800
Khadka Taleefanka Shaqaaqada Guriga	1800 656 463
Adeega Turjubaanka Qoraalka iyo Afka	131 450
Khadka Taleefanka Caawimaada ee DoCS	132 111
Si aad cabasho uga sameeyso ku saabsan DoCS	wecitaan bilaash ah 1800 000 164

Macluumaadka adeegyada loogu talagalay qoysaska waxaa laga helaa:

www.community.nsw.gov.au

www.families.nsw.gov.au

www.raisingchildren.net.au



NSW Department of
Community Services